

OGEYSIIS

Ku Saabsan Kharashyada Kiisaska Ka-badbaadin **Xumeyn iyo Ka-badbaadin Xasaradeyn**

Dacweeyuhu wuxu xereystay Dacwad ka-badbaadin Xumeyn, ama Dacwad Ka-badbaadin Xasaradeyn iyada oo ay maxkamaddu ogaatay inay jiraan eedeymo Budhcadnimo Guri, Dabagalid, ama Farosaar Galmo. Ma jiraan wax ah kharash oo la saaro dacweeyaha oo la xidhiidha arrinta.

Iyada oo la raacayo qodobada gaarka ah ee Xeerka Federalka ee Budhcadnimada lagula Kaco Haweenka ee 2000, **42 USC § 3796gg-5(1)(1)**, waa in dawlad Gobol, Degmo ama Deegaan aanay dhibane ka qaadin kharash ama lacag “la xidhiidha xereynta, soo saarista, diiwaangalinta, ama gacan ka saarista amar ka-badbaadin, ama codsi amar ka-badbaadin, si loo badbaadiyo dhibane budhcadnimo guri, dabagalid, ama farosaar galmo.” (Fiiri **42 USC § 3796gg-5(1)(1)** hoos).

Haddii ad qabtid su'aalo ama walaacyo ku saabsan Ogeysiiskan, fadlan la xidhiidh Maamulaha Xafiiska Karaaniyada ee Maxkamadda oo lambarkiisu 207-213-2855.

42 U.S.C. § 3796gg-5. Kharashyada dacwadaha dambi iyo amarada k-badbaadinta

(a) Guud ahaan. Gobol, dawlad qabiil Hindi Maraykan, ama unug dawlad hoose, xaq uma yeelan doono lacag-siintan hoos timaadda qaybtan [42 USCS §§ 3796gg et seq.] haddii aan Gobolka, dawladda qabiilkha Hindida Maraykanka, ama unugga dawladda hoose --

(1) cadeyn in shuruucdilisa, siyaasaddiisa, ama habdhagannadiisu aanay rabin, marka ay tahay dacwad ku qaadista fal ah xad-gudub ama dambi budhcadnimo guri, ama la xidhiidha xereynta, soo saarista, diiwaangalinta, ama gacanta ka saarista amar ka-badbaadin, si loo badbaadiyo dhibane budhcadnimo guri, dabagalid, ama farosaar galmo, in dhibanuhu bixiyo 'kharashyada la xidhiidha xereynta dacwad dambi oo lagu qaadayo dambi-galahaa, ama kharashyada la xidhiidha xereynta, soo saarista, diiwaangalinta, ama gacan ka saarista waaran, yeedhis markhaati, ha laga bixiyo gudaha ama dibadda Gobolka, maamulka qabiil, ama degmo: ama

(2) siin Xeer-ilaaliyaha Guud xaqiijin in shuruucdooda, siyaasaddooda iyo habdhagannadoodu ay adeeci doonaan shuruudaha baaragaraafka (1) gudaha ka dambeeyaa --

(A) muddada dhammaanaysa taariikhda u kalfadhiga ku xiga ee Golaha Gobolku dhammaanayo; ama

(B) 2 sanno kadib taariikhda hirgalinta Xeerka Budhcadnimada Lagula Kaco Haweenka ee 2000 [hirgalay 28-kii Okt., 2000].

(b) Dib-u-qaybin. Lacagaha laga xejisto Gobol, unug dawlad hoose, ama dawlad qabiil Hindi Maraykan oo hoos timaadda qayb-hoosaadka (a) waxa loo qaybin doonaa Gobollada, unugyada dawlad hoose iyo dawlad qabiil Hindi Maraykan ee kale, isku xig ahaan, oo ah saami u helis ahaan.

(c) Qeexid. Qaybtan, ereyga "amar ka-badbaadin" wuxu leeyahay macnaha ereyga lagu siiyay qaypta 2266 ee title 18, Xeerka Maraykanka.